Abriil 2023

# Dardargalinta heshiiska siyaasadeed ee Jubaland

## Fursadaha dardargalin wadahadal

**Faallo Kooban:** SDP.02

# Dulmar guud: heshiis siyaasadeedka liicliicaya ee Jubaland iyo hannaanka doorasho ee la isku maandhaafsan yahay

Tan iyo markii la sameeyay dowlad-goboleedka Jubaland 2012-kii, tobannaan sano oo colaado ah ka dib, xasilooni ayaa ka jirta qeybo kamid ah gobolka. Iyadoo ay side tahay, waxaa weli sii socda amni darrada, gacan ka haal siyaasad la xiriira, dhibaatooyinka bini'aadamnimo iyadoo uu jiro khilaaf soo noqnoqday oo u dhexeeya Jubaland iyo dowladda federaalka. Kala qeybsanaanta siyaasadeed ayaa ka muuqata dhaq-dhaqaaqyada ka jira gobolka: Al-Shabaab ayaa ka taliya inta badan gobolka Jubbada Dhexe, iyadoo aanay jirin wadashaqeyn ka dhexeysa madaxda gobolka Gedo iyo maamulka Jubaland. Xasilooni-darrada ka jirta Jubaland ayaa dhawaan isu beddeshay gacan ka dal, iyadoo khilaafka u dhexeeya dowlad-goboleedka iyo dowladda federaalka uu ka jiray Gedo intii u dhexeysay 2019-2021.

Xasilooni-darrada Jubaland waxa ay ka dhalatay qayb ahaan habacsanaanta 'heshiiska siyaasadeed' oo ah hannaanka asaasiga ah oo ay ku heshiiyeen jilayaasha siyaasadda ee qeybsiga, iyo tartanka, awoodaha. Heshiiska siyaasadeed ee Jubaland waxa uu leeyahay dhowr cilladood. Ugu horeyn, weli ma hiçin heshiis waara oo ku saabsan qeybsiga kheyraadka ee guud ahaan dowlad-goboleedka, gaar ahaan dakhliga kasoo xarooda dekedda Kismaayo iyo xuduudaha dalalka Itoobiya iyo Kenya. Loollanka loogu jiray Kismaayo gaar ahaan, oo ah caasimadda dowlad-goboleedka, ayaa 30-kii sano ee la soo dhaafay xuddun u ahayd dhaqdhaqaaqyada colaadeed, waxa ayna weli aasaas u tahay tartanka kooxaha.

Midda labaad, amniga guud ee Jubaland ayaa u kala qeybsan gobollada Gedo, Jubbada Dhexe iyo Jubbada Hoose, iyadoo inta badan hay'adaha amniga ay diiradda saaraan loollanka siyaasadeed halkii ay xaqiijin lahaayeen amniga muwaadiniinta.

Midda saddexaad, waxaa xaddidan fursadda in la dhiso maamul furan oo loo dhan yahay. Beelo badan ayaa saluugsan nidaamka awood qeybsiga beelaha ee hay'adaha Jubaland, iyadoo habraacyadii hore ee 'doorasho' lagu dhaliilayay faragelin siyaasadeed iyo hufnaan la'aan. Inkastoo inta badan loollanka gacan ku heynta Kismaayo uu u dhexeeyo qabiilo dhowr ah, haddana waxaa sidoo kale lagu sifeeyay takoorka beelaha aan awoodda badan lahayn, kuwaasoo waayay metelaad wax-ku-ool ah oo ay ku yeeshaan hay'adaha ama fursad ay kaga qeyb qaataan go'aannada siyaasadeed.

Midda afaraad, tan iyo sanadkii 2012, xiriirka dowlad-goboleedka iyo dowladda federaalka ayaa inta badan ahaa mid cakiran, iyadoo maamulladii federaalka ee is xig-xigay ay doonayeen in ay awood isticmaalaan oo ay kaashadaan kooxaha ka jira Jubaland, taasoo sii xumeyneysay xaaladda siyaasadeed ee awalba kacsaneyd.

Midda shanaad, daneeyeyaasha dalalka gobolka ayaa sii xumeeyay dhaqdhaqaaqyada colaadeed iyagoo taageeray kooxaha ku loollamayay Jubaland.

Ugu dambeyn, Al-shabaab oo aan weli qeyb ka ahayn heshiiska siyaasadeed ee Soomaaliya ayaa weli ku xooggan gobolka Jubbada Dhexe, waxa ayna weli weerarro ka geystaan dowlad-goboleedka Jubaland iyo guud ahaan dalka.

Daciifnimadan ka jirta heshiiska siyaasadeed ee Jubaland ayaa sahlay xasaradihii iyo gacan ka hadalkii billowday sanadkii 2018 ee la xiriiray loollanka doorashadii qaran ee daba-dheeraatay. Xitaa kadib markii lasoo gabagabeeyay hannaankii doorashada bishii May 2022, waxaa jiray xasillooni-darro siyaasadeed iyo suurtagalnimada in uu khilaaf dhaco. Dhawaan, waxaa soo ifbaxay xiisad ka dhalatay golaha sharci-dejinta ee dowlad-goboleedka oo ansixiyay in muddo kordhin hal sano ah loo sameeyo baarlamaanka iyo madaxweynaha. Doorashada soo socota ee Jubaland ayaa qorsheysneyd inay dhacdo bisha Ogosto 2023, iyadoo arrinkan uu muran badan ka jiro marka loo eego isku dayada kooxaha aan qeybta ka ahayn maamulka ay ku doonayaan inay wax kaga beddelaan nidaamka awood qeybsiga beelaha. Muddo kordhintu waxa ay sii kordhisay xiisadda iyo loollanka.

Haddii la doonayo in horumar dhab ah laga gaaro nabadeynta, horumarka iyo dowladnimada, waa in wax laga beddelaa heshiiska siyaasadeed ee Jubaland, lana abuuro jawi loo dhanyahay oo ay qeybaha kala duwan ee hormuudka uga heshiin karaan sida ugu habboon ee awoodda loo qeybin karo, looguna tartami karo. Si taas loo gaaro, faalladan kooban waxa ay qeexeysaa hababka suurtagalka ah ee dib loogu dardardargalin karo wada-hadallada ku saabsan geeddi-socod doorasho oo ku saleysan is-afgarad, taasoo gogol-dhjg u noqon doonta isbeddel ballaaran oo lagu sameeyo heshiiska siyaasadeed.

# Maareynta doorashooyinka dowlad-goboleedka iyo geeddi-socodka siyaasadeed ee xiga

Maareynta geeddi-socod siyaasadeed oo nabad iyo is-afgarad ku dhisan ayaa muhiim u ah Jubaland. Horumar la taaban karo oo laga gaaro heshiiska siyaasadeed waxa ay suurta geli kartaa keliya muddo xileedka siyaasadeed ee soo socda iyo wixii ka dambeeya sidaas darteed si weyn ayay ugu xiran tahay natiijada hannaanka doorashada dowlad goboleedka. Hannaan doorasho oo ku saleysan is-afgarad waxa uu horseedi karaa in dib loo soo cusbooneysiiyo wada-shaqeynta iyo iskaashiga hormuudka muhiimka ah, taasoo gundhig u noqoneysa heshiis laga gaaro awood qeybsiga iyo wadaagga kheyraadka, amniga, iyo, ugu dambeyn, dimuqraadiyeynta. Taa beddelkeeda, hannaan doorasho oo lagu kala qeybsan yahay waxa uu soo dedejin karaa colaado iyo in uu sii xumaado heshiiska siyaasadeed. Qodobada soo socdaa waxay sharraxayaan hababka suurtagalka ah ee lagu maareyn karo geeddi-socodka:

- **In la sameeyo nidaam wada hadal si looga doodo hannaanka doorasho ee dowlad-goboleedka.** Waxaa lama huraan ah in sida ugu dhaqsaha badan loo dejiyo nidaam wada-hadal ee geeddi-socodka doorashada — oo ay ka mid yihiin waqtiga, nooca iyo hirgelintaba— kaasoo u dhexeeya daneeyayaasha Jubaland. Billowga hore, waxaa arrinkan lagu gaari karaa habab aan rasmi ahayn oo ay Soomaalidu hoggaamiso oo ku wajahan dib-usoo-celinta khadadka xiriir ee u dhexeeya qeybaha kala duwan, gaar ahaan hoggaanka dowlad-goboleedka iyo masuuliyiinta Gedo. Dowladda federaalka, oo ay weheliyaan masuuliyiinta xiriirka la leh Jubaland ee heer qaran, sida xildhibaanada federaalka, waxay markaas door ka qaadan karaan dardargelinta wada-hadallo ballaaran oo dhexmara jilayaasha

Jubaland, taasoo horseedi karta in la qabto shirweyne Jubaland oo dhan ah oo ay ku jiraan qeybo kala duwan (siyaasiyiin, odayaal, ganacsatada, iyo bulshada rayidka).

- **Xallinta tabashooyinkii hore iyo dib-u-dhisidda kalsoonida.** Ka hor inta aan loo gudbin arrimaha muranka badan dhaliyay ee ku saabsan doorashada, sida waqtiga doorashada, geeddi-socodka wadahadalku wuxuu abuuri karaa kalsooni iyadoo la abuurayo fursad lagu xalliyo tabashooyinkii hore; in iskaashi laga sameeyo gurmadka abaaraha; in laga heshiiyo hannaan amni kumeelgaar ah oo loo sameeyo Gedo; in lagu heshiiyo wareejin maaliyadeed oo sida la isola garrot loo fullyo si loo taageero horumarinta goobaha ka baxsan Kismaayo; iyo in ay laga heshiiyo mabaadii'ida aasaasiga ah ee hannaanka doorashada.

- **In laga heshiiyo qaabeynta iyo hirgelinta doorashada.** Habka wada-hadalku wuxuu markaa u baahan doonaa in la dejiyo waqtiyo lagana xaajoodo hannaan naqshadeyn oo kordhinaya fursadaha doorasho xor iyo xalaal ah. Qodobada ugu muhiimsan ee lagu heshiin karo waxaa ka mid ah in waqti hore la dhiso guddi doorasho; in si wadajir ah loo aqoonsado odayaasha hoggaamin doona xulista baarlamaanka; xeerar hufan oo habraaca doorashada ah; iyo cadeynta doorka dowladda federaalka ee geedi socodka, iyo sidoo kale doorka bulshada rayidka ah ee kormeeridda. Shirku waa in uu sidoo kale billaabaa qeexidda iyo mudnaan-siinta arrimaha muhiimka ah ee heshiiska siyaasadeed ee u baahan in la wajaho muddo-xileedka xiga, iyadoo maamulka soo socdaa uu yeelan doono bar bilow la isku raacsan yahay.

- **Taageerada dowladda federaalka ee hannaanka doorashada dowlad-goboleedka.** Dowladda federaalka waxa ay ciyaari kartaa door muhiim ah iyadoo ka shaqeyn karta dhexdhexaadinta dhinacyada si loo helo doorasho xor ido xalaal ah, oo waqtigeeda ku dhacda.

# Wax-ka-bedelidda heshiiska siyaasadeed

Haddii nidaamka doorashada uu Jubaland u horseedo maamul xalaal ah oo is-afgarad ku dhisan, dowlad-goboleedka ayaa fursad u heli doonta in ay dejiso qorshe cad oo macquul ah oo wax looga beddelayo heshiiska siyaasadeed. Waa in qorshe kasta oo noocaas ah uu noqdaa mid dabacsan oo wax-ka-beddel lagu sameyn karo, tixgelinaya adkaanshaha arrimaha aasaaska u ah heshiiska siyaasadeed, waana in ay ku heshiiyaan dhinacyada ay khusayso. Marka la eego caqabadaha, in horumar la taaban karo laga gaaro arrimahan waxa ay u badan tahay in ay qaadato muddo-xileedyo siyaasadeed oo dhowr ah waxayna u baahan tahay wada-xaajood joogto ah. Wajigani waxa kale oo uu ku dari karaa ka-qeybgal bulsho oo weyn oo lala yeesho bulshada rayidka ah, haweenka, dhalinyarada iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay. Wadahadalladu waa inay diiradda saaraan sida loo heli karo siyaabo:

- **Heshiis looga gaaro qeybsiga kheyraadka Jubaland.** Maareynta iyo qeybsiga dhaqaalaha ayaa ah qodobka ugu muhiimsan ee lagu muransan yahay siyaasadda Jubaland. Tan waxaa kamid ah qeybsiga dakhliga, gaar ahaan dekedda Kismaayo iyo xuduudaha Jubaland, iyo sidoo kale arrimo ballaaran oo ay kamid yihiin shaqaaleysiinta, qandaraasyada, mashaariicda horumarinta iyo gargaarka bini'aadamnimo. Arrimahaan waxaa qeyb ahaan

lagu xallin karaa iyadoo loo maraayo dowlado hoose oo lala xisaabtami karo awoodna u leh in ay sameeyaan hab-qeybsiga kheyraadka, iyadoo la adeegsanayo habab lagu heshiiyey si loo hubiyo in kheyraadka si siman loogu qeybiyo guud ahaan dowlad-goboleedka, iyadoo loo marayo awood-daadejin maaliyadeed oo ballaaran oo loo sameeyo dowladaha hoose. Hindisaha noocaan oo kale ah waxaa lagu taageeri karaa iyadoo dib loo soo nooleynayo hannaanka dhisidda goleyaasha deegaanka ee degmooyinka Jubaland, taasoo sidoo kale suurtagelin karta in si weyn loo qeybiyo gargaarka. Intaa waxaa dheer, in si rasmi ah loo qaabeeyo dakhliga xuduudaha ayaa qeyb ka noqon karta heshiiska siyaasadeed. Waa in la xaqiijiyaa in tallaabooyinkan ay la jaanqaadaan wada-xaajoodyada heer qaran ee federaaleynta maaliyadda. Sidoo kale, horumarinta kaabayaasha muhiimka ah ee loogu talagalay kordhinta isdhexgalka dhaqaale ee gudaha Jubaland iyo sidoo kale dalka intiisa kale waxay abuurayaan fursado faa’iido dhaqaale oo labada dhinac ah iyo dhisidda kalsoonida dhanka wadaagga kheyraadka.

- **La sameeyo nidaam awood qeybsi loo dhan yahay.** Si wax looga qabto tabashooyinka waa in hannaan kasta oo siyaasadeed uu tixgeliyaa arrimaha metelaadda ee hay’adaha fulinta, sharci-dejinta dowladda, maamullada gobollada iyo degmooyinka iyo guud ahaan hay’adaha maamulka. Nidaam awood qeybsi oo dhabta ah waa in uu xuddun u noqdaa geeddi-socod kasta oo lagu heshiisiinayo, iyadoo la garawsanayo kala duwanaanshaha bulshada degta Jubaland marka la furayo tartanka loogu jiro xilalka hoggaamineed, sida madaxweynaha. Inkastoo aanay tani daruuri ahayn in ay horseeddo qaab-dhismeed awood-qeybsi oo joogta ah, in la abuuro jawi iskaashi iyo tartan nabad ku dhaca ee dhex mara kooxo badan oo kala duwan ayaa dhalineysaa kalsooni loogu gudbo hannaan dowladnimo oo dimuqraadi ah.

- L**a sameeyo dib-u-heshiisiin iyo xallinta tabashooyinkii hore.** Si loo helo maamul Jubaland ah oo la isku raacsan yahay, waxaa muhiim ah in la sameeyo madal joogto ah oo lagu xalliyo tabashooyinkii hore iyo in la abuuro aqoonsiyo kala duwan oo dowlad-goboleedka ah. Waxaa tani lagu gaari karaa, marka hore, iyadoo lala kaashanayo odayaasha dhaqanka, bulshada rayidka ah, warbaahinta, iyo hal-abuuro ku saleysan dhaqanka iyo hiddaha si loo xalliyo tabashooyinkii hore, laguna heshiiyo qiyam cusub, marka labaadna, in la xoojiyo dowladaha hoose. Tan waa in lagu kabaa dadaallada lagu doonayo in wax looga qabto khilaafyada dhulka—mid taariikh la xiriira iyo mid hadda jiraba—oo ay ku jiraan in la sameeyo siyaasad arrimaha dhulka ah iyo qaababka sharci ee khuseeya.

- **Isku-dhafka ciidamada amniga.** Isku dhafka ciidamada si ay u muujiyaan kala duwanaanshiyaha Jubaland waxay muhiim u tahay sugidda amniga, iyo sidoo kale xallinta is-aamin darrada iyo tabashooyinka, gaar ahaan dhinaca awood qeybsiga. Sidaas darteed, waxaa loo baahan yahay in dib loo eego dhismaha ciidanka daraawiishta, booliska iyo sirdoonka Jubaland. Waxay tani uga dhigan tahay magaalada Kismaayo in laga shaqeeyo sidii loo heli lahaa ciidan ammaan oo si wanaagsan uga tarjuma dadka deegaanka. Waxaa intaa dheer, ciidamada aan diiwangashaneyn ee gobolka Gedo waa in la hoos geeyo talis mideysan, laguna biiriyo daraawiishta iyo booliiska Jubaland, ama Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, iyadoo la caddeeyey maqaamka, maamulka iyo talisyada ciidanka XDS ee ku sugan Jubaland. Howlahan waxa ay u baahan doonaan in la waafajiyo naqshadda amniga qaran. Waa in la qaataa hab taxadar leh si looga hortago in si degdeg ah ciidamada la isugu dhafo ama dib loo qeybiyo, taasoo dhalin karta isku dhac ama carqaladeyn karta kalsoonida ay bulshadu ku qabto ciidamada ammaanka. Nidaamku waa inuu sidoo kale tilmaamaa tallaabooyin kalsooni lagu dhisayo ee looga gol-leeyahay in lagu abuuro xaalado uu Hawlgalka Midowga Afrika ee Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya uga baxo Jubaland.

- **U gundhigidda maamul dimoqraadi ah.** Horumarka laga gaarayo arrimaha muhiimka ah ee heshiiska siyaasadeed, oo ay weheliso doorashooyin dowlad-goboleed oo lagu guulaysto, waxay kor u qaadaysaa suurtagalnimada in si tartiib tartiib ah loogu gudbo doorasho qof iyo cod ah oo ka dhacda Jubaland. Tani waxay ka billaabmi kartaa iyadoo la joogteynayo tartanka furan ee hoggaanka, iyo sidoo kale in la sameeyo xeerar iyo hay'ado hirgeliya doorashooyin dadban oo 'cadaalad ah'. Si guud, casharro ayaa laga baran karaa hannaanka dimuqraadiyeynta Puntland, gaar ahaan sida uu maamulkaas xoogga u saaray dhismaha xisbiyada siyaasadda, si tartiib-tartiib ah u sameynta hababka doorashada dowladaha hoose, iyo sameynta bulsho rayid iso warbaahin kala duwan oo ka hadla danaha kooxaha kala duwan. Hadii doorashada Jubaland ay kusoo dhamaato qaab is-afgarad ku saleysan horumarna laga sameeyo arrimaha kale, waxaa suuragal ah in la tijaabin karo doorashooyinka golaha deegaanka. Iyadoo aan loo eegeynin hababka loo marayo, dhisidda awoodda hay'adaha dowladda, kordhinta hababka isla-xisaabtanka bulshada iyo abuurista fursadaha ka qeybgalka maamulka heer dowlad hoose ayaa noqon doonta mid muhiim ah, taasoo dhidibbada u taagaysa in Jubaland ay mustaqbalka fog gaarto doorasho qof iyo cod ah.

- **Wax-ka-qabashada arrinta al-Shabaab.** Heshiis siyaasadeed oo waara lagama gaari karo Jubaland iyadoo aan la xallin arrinta al-Shabaab. Mudnaanta ay dowladda federaalka siisay dagaalka ka dhanka ah kooxdan hubeysan ayaa aasaas u noqon kara in ay maamulka Jubaland iyo dowladda federaalka iskaashadaan. Guud ahaan, wax-ka-qabashada arrimaha ku saleysan takoorka iyo ka qeybgalka Jubaland waxay wiiqi kartaa awoodda al-Shabaab ee gobolka, taasoo xitaa suurtagelin karta in lala hadlo ama lala heshiiyo kooxda. Intaa waxaa dheer, haddii kalsooni iyo wadashaqeyn ballaaran laga dhex abuuro jilayaasha kale ee Jubaland, wax-ka-qabashada arrinta al-Shabaab waxay noqon doontaa mid aan dhib badneyn.

- **Sii wadista xoojinta xiriirka dowladda federaalka iyo Jubbaland.** Xiriirka taban ee u dhexeeya dowladda federaalka iyo Jubaland waxa uu carqaladeyn karaa dowlad-goboleedka. Sidaas darteed, waxaa muhiim ah in la xoojiyo xiriirka ka dhexeeya labada dhinac, haddii ay tahay iskaashiga muddada dhow iyo xallinta muddada fog ee arrimaha taagan ee la isku hayo. Wada-hadallada ku saabsan arrimaha siyaasadda ee Jubaland ayaa sidoo kale fursad u siin doona dad kala duwan in ay saameyn ku yeeshaan wada-xaajoodka arrimaha qaran.

## Xuquuq

Faalladan Kooban waxaa si wadajir ah usoo saaray Somali Dialogue Platform.

Somali Dialogue Platform waa barnaamij Soomaalida ka taageera sidii loo gaari lahaa is-afgarad ku saabsan arrimaha la isku haysto ee siyaasadeed waxaana fuliya Machadka Rift Valley. Somali Dialogue Platform waxaa maalgeliya Foreign, Commonwealth and Development Office (FCDO) ee Boqortooyada Ingiriiska, Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Denmark, iyo Hay'adda Mareykanka u Qaabilsan Horumarinta Caalamiga (USAID). Aragtiyada faallada kama turjumayaan siyaasadaha rasmiga ah ee Dowlada UK, Dowlada Denmark ama Dowlada Mareykanka. Platform-ku wuxuu leeyahay madaxbannaanida tifaftirka warbixinnaddiisa oo dhan.

Machadka Rift Valley wuxuu ka shaqeeyaa bariga iyo bartamaha Afrika si uu usoo saaro aqoon maxalli ah oo loo adeegsan karo horumarinta arrimaha bulshada, siyaasadda iyo dhaqaalaha.

Xuquuqda daabacaadda © Machadka Rift Valley 2023.

Warbixintan waxaa la daabacay iyadoo la adeegsanayo Creative Commons Attribution-Non-Commercial-NoDerivatives License (CC BY-NC- ND 4.0).